

URURKA MIDNIMADA DIREED



BISMILAAHI RAXMAANI RAXIIM

Ku: Saxaafada Afka Somaliga ku hadasha

UJEEDO: WARMURTIYEED (COMMUNIQUE)

Salaadiinta, Boqorada, Ugaasyada, Cuqaasha, saraakiisha, siyaasiyiinta, aqoonyahanka iyo waxgaradka beelweynta Direed ee ku bahoobay Ururka Midnimada Direed (UMD) waxay halkan ku cadeynayaan in doorasho ku sheegta sida qabyaaladaysan looga abaabulay waxaa loogu yeedhay Jubbaland oo ah dhulkii loo yaqaanay Waamo state ay tahay waxba kama jiraan, sharcigana aanan waafaq saneyn.

Nimanka meesha isku caleemo saaray dhamaantood waxay kasoo kala jeedaan Kenya iyo Ethiopia, dadkii soomaaliyeed ee dhulka lahaana wax lug ah kuma ay lahayn doorasho ku sheegtaas halkaa ka dhacday. Maamulka federalisim'ka ah ee laga dhaqan geliyey koonfurta Soomaaliya waxaa dhamaantood maamula dadka degaanka u dhashay, marka laga reebo maamulka Jubaland. Dadka degaanka, qaasatan beelaha Direed ayaa dibada iska taagay maamulkan u dhisan reer gaar ah, kuna dhisan qabyaalad iyo boobka xuquuqda dadka Soomaaliyeed ee halkaa ku dhaqan.

Dhinaca kale nimankan Waamo State isku caleemo saaray ee iyagu ka soo jeeda dalalka dariska ah reerahoodu waxay ka dagaan gobolada Jubbooyinka oo 10 dagmo ah dagmada Af-madaw iyo Badhaadhe oo kaliya 8da dagmo ee kale oo kala ah: Kismaanyo, jamaame, Kulbiyow, Jilib, Xagar, Saakow, Dajuuma iyo Bu'aale waxaa u badan ummada Direed waxaana soo raaca Hawiye iyo Digil. Gobolka Gedo oo isna ah kan saddexaad waxaa ku xooggan qabiilada Mareexaanka waxaana si buuxda ula wadaaga dagmooyinkiisa; Luuq' Doolow' Baardheere iyo Ceel-waaq Beelaha Direed iyadoo ay meelo kalana ka soo galaan Beelaha Raxanwayn.

Ugu dambeytii Ururka Midnimada Direed (UMD) wuxuu caddaynayaa in 10kii sano ee ugu dambaysay Waamo State ay ka jirtay caddaalad darro qaawan oo shacbiga leh dhulkaas lagu hayay taasoo aanay suuragal ahayn inay ka sii jirto Gobolada Jubbooyinka (Waamo State) xaq darada iyo xadgudubka lagu hayo dadka, degaanada, iyo dalka intiisa kale.

Fiiro gaar ah, Ururka Midnimada Direed (UMD) waxaa ku bahoobay afarta haamood ee beelweynta Direed, Madaxweyne Dir, Maha Dir, Madoobe Dir iyo Madaluug Dir.

Wa bilaahi towfiiq

August 30/2019

Professor Abdisalaan Ahmed Yusuf, Mobil: +919121679427

Gudoomiye ku xigeenka Ururka Midnimada Direed (UMD)